

باللغة الصومالية



BARAARUJIN

LAGAMAMAARMAANAH

OOKU SAABSAN

**BEENAYNTA
DARDAARANKA**

**LOO TIIRIYEH
SHEIKH AHMED**

U ADEEGIHI

**XARAMKA NEBIGA
EE SHARAFTA LEH**

**WAXA ALLIFEY
SAMAAXATUL -SHEIKH**

**ABDULAZIZ BIN ABDAULLAH
BIN BAZ**

BARAARUJIN
LAGAMA MAARMAAN AH

BARAARUJIN
LAGAMA MAARMAAN AH

OO KU SAABSAN

BEENAYNTA
DARDAARANKA

LOO TIIRIYEEY

SHEIKH AHMED

U ADEEGIHII

XARAMKA NEBIGA

EE SHARAFTA LEH

WAXA ALLIFEY
SAMAAXATUL -SHEIKH

ABDULAZIZ BIN ABDALLAH

BIN BAZ

بسم الله الرحمن الرحيم

Ka: Abdulaziz Bin Abdallah Bin Baz

Ku : Qof kasta oo muslimiinta ka mid ah oo akhristay Dardaarankaas Ilahay Islaamka ha ku dhawree hana naga magan geliyo annaga iyo iyagaba sharta been-abuurayaasha jaahiliinta ah ee xun-xunka ah (Aamiin) Ilahay korkiinna ha yeelo Nabadgelyadiisa iyo naxariistiisa iyo barakaadkiisa .

Intaas ka dib :

Waan akhriyey oraah loo aaneeyey Sheikh Ahmed cinwaankeeduna ahaa (kani waa dardaarankii ka yimid Al-Madiina Al-Munawara kana yimid xaga Sheikh Ahmed u adeegah Xaramka Nebiga ah eesharafta leh)

Wuxuna ku yiri dardaarankaas :-

Aniga oo soo jeeda habeen jimce ah oo Qur'aanka Kariimka ah aqrinaya ka dib markaan magacyada wanaagsan ee Ilahay aqriyay, intaa markaan aqriyey waxan isu diyaariyey inan seexdo, markaasaan waxan arkay Rasuulkii Ilahay Naxariis iyo Nabad gelyo korkiisa ha ahaatee, Nuurka ifaya u saaxiibka ahaa, Rasuulka ﷺ oo la yimid daliilo Qur'aan ah iyo Axkaamta Shareecada, una ah naxariis Caalamka oo dhan ahaana Sayidkeenii Muhamad ﷺ wuxuna igu yiri sheikh Ahmedow : -

Waxan iri : [Hee Rasuulkii Ilaahayow !!]
addoomada Ilaahay kii ugu wanaagsanaayow.

Wuxu igu yiri :- waxaan ka yax-yaxsanahay dadka falalkooda xun-xun mana karo inaan Ilaahay iyo Malaa'ikta la hor tago , maxaa yeelay laba jimce dhexdooda waxa dhintay boqol iyo lixdan kun o qof oo diin la'aan ku dhintay, ka dibna wuxu sheegay qaar ka mid ah denbiyada dadku ku dhacaan. Ka dibna wuxu yiri : kani waa dardaaran naxariis u ah dadka kana yimid Ilaahaygii Casiiska ahaa Jabbaarkana ahaa .

Ka dib wuxu sheegay qaar ka mid ah calaamadaha saacadda Qiyaamaha lagu garto, ilaa uu ka yiraahdo : Ahmedow u sheeg dadka dardaarkan, maxaa yeelay waxaa lagaga soo guuriyey Lawxul-maxfuudka qalinka lagu qoro qadarka.

Hadaba qofkii dardaarkan qora oo u kala dira magaaloooyinka ama meel ka qaada oo meel kale geeya guri weyn ayaa Jannada looga dhisayaa.

Qofkii aan qorin magaaloooyinkana aan u kala dirin waxa laga hoojinayaa Shafaacadayda maalinta qiyaamaha, qofkii faqiir ah oo qora Ilaahay baa hodon ka dhiga, kii qaamaysanna Ilaahay baa qaan bixiya, kii denbiile ahna Ilaahay baa u denbi dhaafa isaga iyo labadiisa waalidba barakada dardaarkan Qofkii aan qorina oo addoomada Ilaahay ka mid ahna Wejigiisa ayaa madoobaanaya Adduunyo iyo Aakhiroba, shiikh Ahmed wuxu yiri Ilaahaygii -

Weynaa baan ku dhaartay (saddex goor)
dardaarankani waa sugaran yahay haddii aan
beenaale ahayna waan dhiman oo dunida ka tegi
anigoo diin la'aan ah dardaaranka qofkii
rumeeeyana wuu ka nabad gelayaa cadaabka Naarta
ninkii beeniyana wuu gaaloobaya.

Sheikh Abdil-aziz Bin Baz wuxu yiri :- kani waa
dardaarankii been-abuuradka ahaa ee Nebiga lagu
been-abuurtay oo kooban .

Waxaan maqlay been-abuuradkan marar badan iyo
sannado badan oo kala duwan iyadoo lagu fidinayo
dadka dhexdiisa xilliyo kala duwan una buun-
buuninayaan kuwo badan oo dadka caamada ah ka
mid ah ereyadeedana ay kala duwan yihiin .

Been-abuurtahaasi wuxu oranayaa inuu arkay
Nebiga ﴿ isagoo hurda dardaarnkanna uu ka so
xanbaaray .

Shiekh Abdilaziz Bin Baz wuxu yiri :- been-
abuuradkaan ugu danbeeyey ee aan kor kuugu soo
sheegnay akhristow, wuxuu sheegtay been-
abuurtuhu inuu arkey Nebiga ﴿ markuu u
diyaar garoobey hurdada laakiinse aanu hurdada ku
arag, arintaasna macneheedu waa : inuu ku arkay
soo jeed, been-abuurtuhu wuxu ku sheegay
dardaarankiisa dhexdiisa waxyaalo badan oo been
ah weliba tii ugu caddayd iyo baadil kii ugu
caddaa .

Waxaanse akhristoow kugu baraaru jinayaa goor dhow hadalkaan baadil nimadiisa Ilaa hay hadduu yiraahdo, oraahday dan soo socota .

Waan baraarujiyey been-abuuradkan sanooyinkii tegey, dadkana waan u caddeeyey inay tahay been tan ugu cad iyo baadil tan ugu cad, markii aan arkay been-abuuradkan ugu danbeeeyey waxa qalbigayga ku noq-noqonayey inaan kitaab ka qor dardaarankaas, maxaa yeelay baadil nimadkiisoo cad iyo been-abuurtaha dhiiranaantiisa weynideeda weyn uu ku been-abuuranayo been.

Maanan ahayn ku maleeya baadil nimadkeeda inuu baafinayo ruux leh wax aragti ah ama Diin toosan, waxay ii sheegeen kuwo badan oo walaalaha ka mid ah in dardaarankani uu ku faafay dad badan ayna isu gudbiyeen qaarkoodna ay rumeyeen.

Sidaa daraadeed waxa ii muuqatay inuu waajib ku yahay Aniga iyo kuwa ila midka ah qoritaan kitaab laga qoro, maxaa yeelay baadil nimadkeedoo cad iyo iyadoo lagu been-abuurtay Rasulka dushiisa  si uusan qofna ugu kedsoomin, ruuxii fiir-fiiriya ee ah dadka Cilmiga iyo Iimaanka ama Fidrada Nabad-gashan iyo caqliga fayaw leh wuxu dhinacyo badan ka garanayaa inay tahay been iyo been-abuurasho.

Waxaan weydiiyey qaar ka mid ah Sheikh Ahmed qaraabadiisa kaasoo ah kan loo aaneeyey Been-abuurashadan.

Wuxuuna iigu jawaabey inay tahay been-abuurad lagu been-abuurtay Sheikh Ahmed mana uusan dhihin weligii. Sheikh ahmedkaa la sheegayo wuxuu dhintay waqtii hore, hadaba aynu ka so qaadno inuu sheikh Ahmedka la sheegay ama mid ka weyn uu sheegat inuu Nebiga ﷺ arkay isago hurda ama soo jeeda, una dardaarmay dardaarankan, waxaynu dhab ahaan u ogaan karnaa inuu beenaale yahay, wixii sidaa ku yirina uu yahay Shaydaan, Rasuulkana ﷺ aanu ahayn dhinacyo badan.

Wejiga laad : Inaan Nebiga ﷺ lagu arki karin soo-jeed dhimashadiisii ka dib, qofkii sheegta ee ah jaahiliinta Suufiyada inuu arkayo Nebiga ﷺ isagoo soo jeeda ama uu soo xaadirayo Mawliidka iyo wixii la mid ah arrintaas wuu gefey, gef kan ugu xun wuxuna isku dheehay dheehitaan tan ugu daran, wuxuna ku dhacay gef weyn wuxuna khilaafay Kitaabka iyo Sunnada iyo kulanka dadka cilmiga leh maxaa yeelay dadka dhintay waxay ka soo baxayaan qubuurohooda maalinta Qiyaame adduunyadase Maya ! [oo ka soo bixi maayaan qubuurtooda]. ninkii yiraahda arintaaa wax ka badan wuu been sheegay been cad, ama waa mid gefey oo ay isaga dheehan tahay, xaqiina aan garan, xaqasoo ay garteen Salafkii wanaagsanaa, ayna qaadeen korkiisa Asxaabtii rasuulka ﷺ iyo kuwii wanaaga ku raacay.

Wejiga 2aad :- Rasuulka ﷺ kuma hadlo wax khilaafsan xaqa, noloshiisa iyo geeridiisaba midna , Dardaarankani wuxu ku khilaafsan yahay shareecada Nebiga ﷺ khilaaf cad lehna dhinacyo badan sida imaan doonta.

Nebiga ﷺ waxa lagu arki karaa hurdada, qofkiise hurdo ku arka suuradiisii wanaagsaneyd waxa dhaba qofkaasi inuu arkay, maxaa yeelay Shaydaanku isuma ekaysiin karo Suurada Nebiga ﷺ sida ku soo aroortay xadiiska wanaagsan ee saxiixa ah, wuxuse arinka gun-dhigiisu yahay Iimaanka qofka riyooday intuu le'eg yahay iyo runtiisa iyo cadaaladdiisa iyo koobitaankiisa iyo diintiisa iyo amaanadiisa, mase ku arkay nebiga ﷺ suuradiisii ama qayrkeed.

Haduu ka iman lahaa xaga Nebiga ﷺ xadiis uu yiri noloshiisii kaasoo aan ku iman wadada kuwa lagu kalsoon yahay ee caadiliinta ah ee koobay, lama cuskadeen xadiiskaas lamana xujaysteen isaga, amase wuxu ku yimid wadada kuwa lagu kalsoon yahay ee koobay laakiin wuxu khilaafayaa werin uu weriyey mid ka xifdi badan kana kalsooni badan oo iyagaa ka mid ah, khilaafkaasoo uusan suuroobeyn in lagu kulmiyo laba Riwaayadood, waxay ahaan lahad labada riwaayadood mid ka mid ah mid la nasaqay oo aan lagu camal falayn, midda kalena waxay ahaan -

Lahayd mid wax nasaqday laguna camal falayo intuu suuroobayo arinkaasi isagoo shuruudiisa wata.

Haddii aysan suuroobin nasaqiddaasi, ayna suuroobin kulmintii waxaa waajib ah in laga tuuro riwaayad kan xifdigiisu uu yar yahay ayna caddaaladiisu gaaban tahay marka riwaayaddaas xukunkeedu wuxu noqonayaa mid ah goonni aan lagu caaml falayn.

Hadaba sidee bey u suuroobi dardaaran aan la garanayn qofkii ka soo guuriyey xaga Rasuulka ﷺ oo aan la garanayn cadaaladdiisa iyo amaanadiisa, taas oo ay xaaladdeedu sidan tahay waxa xaqiicho ah in la tuuro oon la milicsan xageeda, yuusan ahaaninba dhexdeeda wax khilaafsan sharciga, sidee bay ahaanaysaa dardaarkanakaas haddii uu kulansado arimo badan o ku tusinaya inaysan xaq ahayn oy tahay mid lagu been abuuray Rasuulkii Alle ﷺ ayna kulansanayso jidayn Diin aan Ilaahay idmin.

Nabigu ﷺ wuxu Xadiis ku leeyahay :

(من قال على ما لم أقل فليتبوأ مقعده من النار)

[Qofkii iga sheega wax aanan oranin ha u diyaar garoobo meeshii uu Naarta ka fariisan lahaa .] !!
Beenaalahan Nabiga wuxuus an oran ku been abuuray wuxu yiri wuxuus an Nabiga ﷺ oran, been cadna wuu ka sheegay oo khatar ah .

Maxaa uga haboon gooddigan weyn ? ! maxaan
 uga xaqnimo badan isaga gooddigan ? hadduusar
 u deg-degin TAWBAD dadka dhexdiisana uu ka
 faafiyo inuu ku been sheegay dardaarankaas, maxaa
 yeelay qofkii fidiya shay baadil ah ugana dhiga
 dadka inuu shaygaasi diinta ka mid yahay
 Tawbaddiisu ma ansaxayso (laga aqbali maayo)
 inuu dadka ogaysiyo mooyee ugana sheego inuu
 waxaasu khalad iyo been-abuurad ahaa, waana in
 dadku ogaado in ninkaasi wixii hore ka tawbad
 keenay waxbana ayna ka jirin, wixii intaas ka
 danbeeyana uusna mas'uula ka ahayn, taas
 macnaheedu waxa weeye inuu naftiisa beeniyo
 waxyaalihii uu horey ugu dhaqmi jireyna uu buriyo
 dadkuna ya sidaas uga war hayaan, ilaahay wuxuu
 Aayad qura'aan ah ku leeyahay :

(إن الذين يكتمون ما أنزلنا من البيانات والهدى من بعد ما
 ببنواه للناس في الكتاب أولئك يلعنهم الله ويلعنهم اللاعنوں إلا
 الذين تابوا وأصلحوا وبينوا فأولئك أتوب عليهم وأنما التواب

الرحيم) سورة البقرة 159-160

[Kuwii qarinayey Qur'aanka aan soo dejiney ee
 cad-caddaa iyo Hanuunka ka dib intaanu dadka u
 caddaynay Kitaabka dhexdiisa, kuwaasi Eebe waa
 ka dheeraynayaa Naxariistiisa, waxana naclada
 kuwa wax nacladayey, kuwii mooyaane toobad
 keenay, hagaajiyey oo caddeeyey ,

Kuwaa waan ka Towbad aqbalayaa, waxaanna ahay Toobad-aqbale Naxariista.]

Ilaahay nasahnaaye korna ahaaye wuxu ku caddeeyey Aayaddan sharafta leh dhexdeeda : Qofkii qariya arin xaq ah, Tawbaddiisa uu ka twabad keeno qarintaas xaqqa in aanay ansaxaynin inuu hagaajiyo oo caddeeyo ka dib mooyee, Ilaahayna nasahnaaye addoomadiisa Diinka wuxu u kaamil yeelay nicmadana ugu dhammays tiray diriddii uu soo diray Rasulka Muhammad ﷺ iyo waxyigii uu Ilaahay u waxyooday Nebaiga xagiisa oo ah sharciga kaamilka ah, umana oofsanin isaga illaa intii uu ka dhammays tiray kana caddeeyey gadaasheed mooyee, sida uu Eebbe yiri Qaalib ahaaye oo weynaaaye :

(اليوم أكملت لكم دينكم وأتممت عليكم نعمتي ... الآية)

[Maanta oo ah { Maalintii carafa } ayaan idiin kaamil yeelay Diintiinna, waana idiin dhammays tiray nicmadayda].

ku been-abuurtaha dardaarkan wuxu yimid qarnigii afar iyo tobnaad, wuxuna doonayaa inuu ku dheeh geliyo dadka Diin cusub oo uu qofkii sharcigiisa qaataa Jannada gelayo, qofkii aan qaadan sharcigiisana loo diidi Jannada uuna gelayo naarta, wuxuna rabaa inuu ka dhigo dardaarkan uu been-abuurtay inuu ka weyn yahay Qur'aanka kana fadli badan yahay.

Iyadoo uu been-abuurtay dardaarankan dhexdiisa in qofkii qora dardaarankan oo ka dira magaalo una dira magaalo kale ama ka dira meel una dira meel kale in Jannada Daar looga dhisayo, qofkii aan qorin oo aan dirin waxa laga qadinayaa Shafaacada Nabiga ﷺ maalinta Qiyaamaha, arinkaasina wuxu ka mid yahay beenta ugu xun iyo waxyaabah ku tusaya dardaarankan inuu been yahay kuwa ugu cad, iyo qofka been abuurtay xishood yaridiisa iyo ku been-dhiirannaantiisa weynideeda ; maxaa yeelay qofkii qora Qur'aanka kariimka ah una dira magaalo ilaa magaalo ama ka dira meel ilaa meel fadligan uma ahaadeen, hadduusan ku camal falin Qur'aanka Kariimka ah , hadaba sidee buu ugu ahaan fadligani qofka qoray been-abuuradkan ? !! una guuriyey magaalo ilaa magaalo kale ! Sidoo kale qofka aan qorin Qur'aanka Kariimka ah oo aan u dirin magaalo ilaa magaalo kale lagama qadin Shafaacada Nabiga ﷺ Hadduu Qur'aanka rumaysan yahay, raacayona sharcigiisa . beentan keligeed oo lagu dhex sheegay dardaarankan way ku filan tahay keligeed inay tusto baadilnimadkeeda iyo kii fidinayey beentiisa iyo xumaantiisa iyo doqoniimadiisa iyo ka fogaan shihiisa uu ka fog yahay garashada waxyigii uu rasuulku la yimid ﷺ oo ah Hanuun . Dardaarankan dhexdiisa waxa ku sugar intaan soo sheegnay mooyee arrimo kale oo dhammaantood -

Waxay ku tusinayaan inaan waxba ka jirin oo ay been tahay, haba ku dhaarto been-abuurtaha dardaarkan Kun dhaarood ama wax ka badan inay sax tahaye, hadduu ku habaaro naftiisa cadaabka ugu weyn iyo ciqaabka ugu daran inuu run sheegayo ma aha mid sheegaya , mana aha mid sax ah, balse dardaarkan WALLAAHI haddana WALLAHI waa been kan ugu weyn, iyo baadil kan ugu xun.

Annagu waxan Eebbe nasahnaaye marag gelinaynaa iyo ciddii nala joogta ee Malaa'ig ah iyo qof kasta oo akhriya qoraalkan ee Muslimiinta ka mid ah markhaanti aan Ilaahay kula kulmayno Qaalib ahaaye oo weynaaye inuu dardaaranka been yahay iyo ku been-abuurasho Rasuulkii Ilaahay ﷺ . Alle ha hoojiyo qofkii beentaas sheegay hana ku abaal mariyo wixii uu mutay.

Waxa ku tusaya dardaarkan inuu been yahay oo baadil yahay marka laga reebo wixii soo hor maray arrimo badan :

Arrinka koowaad : waa hadalkiisii uu yiri been-abuurtuuhu : { Maxaa yeelay jimce ilaa jimce waxa dhintay boqol iyo lixdan kun oo qof oo aan diinta Islaamka haysan } maxaa yeelay arrintani waxay ka mid tahay shay maqan ogaanshihiis , Rasuulkana ﷺ Waxyigii wuu ka go'ay geerdiisa ka dib, markuuse noolaaba muusan ogayn Qeybka , sidee buu u ogaan karaa geeridiisa ka dib ? !!

Waxaana sidaa ku tusinaya hadalkii Ilaahay ee nasahnaaye :

(**قُلْ لَا أَقُولُ لَكُمْ عِنْدِي خَزَائِنُ اللَّهِ وَلَا أَعْلَمُ الْغَيْبَ**) آلية

[Waxad dhahdaa Nebi Muhamadow : Idin dhihi maayo aagtayda waxa yaalla kaydadka Ilaahay, waxaadna dhahdaa Qeybka ma ogi !]

Waxa kaloo ku tusinaya : Ilaahay hadalkiisii korreeye :

(**قُلْ لَا يَعْلَمُ مَنْ فِي السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ الْغَيْبُ إِلَّا اللَّهُ**)
waxaad dhahdaa Nebi Allow ciddii ku sugan cirarka iyo dhulka ma oga Qeybka maqan Ilaahay mooyee] xadiis Saxyix ah oo nebiga laga weriyey waxa ku sugab inuu yiri ﴿ :

(**إِذَا دَرَأَ رَجُلٌ عَنْ حَوْضِي يَوْمَ الْقِيَامَةِ فَأَقُولُ يَا رَبِّ أَصْحَابِي .. أَصْحَابِي فَيَقَالُ لَيْ إِنَّكَ لَا تَدْرِي مَا أَحَدَثُوا بَعْدَكَ !! فَأَقُولُ**

كَمَا قَالَ الْعَبْدُ الصَّالِحُ :

Waxa laga eryi doonaa rag darkayga maalinta qiyaame, markaasaan dhihi doonaa Ebbbow waa Asxaabtaydii !! waa Asxaabtaydii .. markaasaa laygu dhihi doonaa adigu ma ogid waxay sameeyeen gadaashaa ! waxaanan dhihi doonaa sidii uu yiri addoonkii wanaagsanaa :

(**وَكُنْتَ شَهِيدًا عَلَيْهِمْ مَا دَمْتَ فِيهِمْ فَلَمَّا تَوَفَّيْتَ كُنْتَ أَنْتَ الرَّقِيبُ**

عَلَيْهِمْ وَأَنْتَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ شَهِيدٌ)

waxaanna ahaa kii ku marag furaya korkooda -

Intaan dhexdooda joogey, markaad xagaaga ii oofsatayna Adiga ayaa [Eebbow] ahaa kii ilaalinaya korkooda, adiga ayaana wax kasta marag ka ah.]

Arrinka Labaad : ee ku tusaya dardaarankan inuu baadil yahay oo been yahay hadalkiisii uu yiri : (qofkii qora dardaarankan oo cayr ah Ilahay baa maal-qabeen ka dhigaya, ama ahaa mid deyn qaba Ilahay baa deynta ka guda ama ahaa mid denbi galay Ilahay baa denbigeesa iyo kan labadiisa waalidba dhaafaya barakada daardaarankan dartiis). Ilaa dabayaqaqada hadalkaas, taasina waa beenta ugu weyn iyo waxyaabaha ku tusinaya been-abuurtahay beentisiia kuwa ugu cad-cad, iyo Alle ka xishood yarantiisa iyo addoomaha Ilahayba, maxaa yeelay saddexdab arimood kuma sugnaato quraanka kariimka qoriddiisa oo keliya, hadaba sidee bay ugu sugnaan qofkii qora daraararkan baadilka ah !? waxase keliya ee uu rabaa kan xumi dadka inuu dheeh-geliyo oo uu ku xidho dardaararkan si ay u qoraan oo ugu xirmaan fadligan la sheegay, wuxuna dadka ugu yeerayaa in ay ka tagaan sababaha uu Ilahay u jideeyey addoomihiisa, uuna ka dhigo dardaararkan mid lagu gaaro hodontinimo, deyn guditaankeed iyo denbi-dhaafid, Ilahay baan ka magan gelaynaa waxyaalaha sababa hoogga iyo hawada iyo shaydaanka oo la raaco.

Arrinka saddexaad : ee ku tusaya dardaarankan inuu baadil yahay, hadalkiisii uu yiri : (qofkaan qorin dardaarankan oo Addoomaha Ilaahay ka mid ah wejigiisa ayaa madoobaada if iyo aakhiroba), arrintaasina sidoo kale waa been midda ugu xun, iyo waxyaabaha ku tusinaya been abuurtaha beentiisa kuwa ugu cad-cad, iyo dardaarankan baadilnimadkiisa. Sidee bay ugu bannaanaan qof caqli leh garashadiis, qofkii qora dardaarankan o uu la yimid nin aan la aqoon qarnigii afar iyo tobnaad inuu isagoo ku been-abuuranaya Rasuulkii Ilaahay  sheeganayana in qofkii aan qorin dardaarankan wejigiisu madoobaan if iyo aakhiroba, qofkii qorana wuxuu ahaanayaa maal-qabeen ka dib markuu Cary ahaa, mid aan deyn lagu lahayn, ka dib markii deyntu korkiisa is dul fuushay, mid loo dhaafay wixii uu galabsaday oo denbiyaal ahaa.

Nasahnaantaadee .. Eebbow kaasi waa been-abuurasho weyn, Addillada iyo waaqicuba waxay marag ka yihiin been-abuurtahan beentiisa, iyo Alle ku dhiiranaantiisa weynaanteeda iyo Alle ka xishood yaraantiisa iyo dadkaba, kuwaasi waa umado badan oo aan qorin wejiyadooduna ma ay madoobaan . Halkanna waxa jooga jamac o uusan koobi karin Alle mooyee oo qoray dardaarankan marar badan deyntoodiina lagama gudin, cayrnimadoodiina kama harin.

Ilaahay baan ka magan gelaynaa quluubta iilashadeeda iyo denbiyada madoobayntooda, tani waa tilmaamo iyo abaalmarinni aanu sharciga wanaagsani ugu baaqin qofkii qora kitaab midka ugu fadli badan, uguna weyn oo ah QUR'AAN KA kariimka ah. Haddaba sidee bay ugu sugnaan qof qoray dardaaranka lagu been sheegay, kulmisanayana baadillo kala duwan iyo weedho badan oo gaalnimo ah kalana geddisan.

Ilaahay nasahnaanye maxaa uga dul badan qof ku dhiiradey inuu ku been abuurto .

Arrinka afraad : ee ku tusaysa dardaarankan inuu yahay baadilka midka ugu sii baadilsan iyo beenta ugu cad hadalkisii uu yiri : [qofkii rumeeye wuxu ka nabad geli cadaabta naarta, qofkii beeniyana wuu gaaloobayaa] arintaanna iyadana waxay ka mid tahay ku dhiiranaanta beenta midda ugu weyn iyo baadilka kan ugu foosha xun been-abuurtuhu wuxu ugu yeerayaan dadka inay rumeeyaan been-abuuradkiisa, wuxuna sheeganayaa inay haday sidaa yeelaan inay taasi ka nabad gelinayso cadaabta Naarta, qofkii beeniyana uu gaaloobayo.

Ilaahay baan ku dhaartaye wuu weyneeyey beenaalahanii Alle-ku-been-abuuradka, wuxuna sheegay Ilaahay baan ku dhaartaye wax aan xaq ahayn, balse qofka beentaas rumeeya ayaa ah kan mutaystay inuu gaal noqdo, mana aha qofka beeniya waayo waa been-abuurasho iyo baadil iyo

Been aan sal ku lahayn dhabta, annaguna waxan Ilaahay marag gelinaynaa in arrinkaasi been yahay iyo qofka ku been-abuurtay inuu beenaale yahay, wuxuna rabaa inuu dadka u sharchiyeyo wax aan Alle amrin iyo inuu diintooda ka soo dhex geliyo wax aan ka mid ahayn, Ilaahayna diintiisa wuu u kaamil yeelay ummaddaan wuuna u dhammaystiray ka hor intaanu iman been-abuuradkaan afar iyo tobani qarni ka hor, sidaa darteed walaalayaal iyo akhristayaal ku baraaruga arinkaan, kana tigoonaada in aad rumaysaan been-abuuradkan oo kale iyo in dhexdiina lagu buun-buuniyo, waayo xaqqa waxa korkiisa ha Nuur kamana dheeh gal qof raba, sidaa darteed k doona xaqqa daliilkiisa, weydiyyana culimada wixii shaki idin ka galo, hana ku kadsoomina dhaarta benta ah ee beenaalayaasha, maxaa yeelay Ibliiska la nacladay baa wuxu ugu dhaartay labadiinii waalid inuu yahay mid u naseexaynaya. Isago ah kuwa wax kхиyaameeya kan ugu weyn iyo beenaalayaasha kan ugu been badan, sida uu Ilaahay kaga sheekaynayo isaga suuradda Al-acraaf dhexdeeda halka uu Eebbe nasahnaaye yiri :

(وَقَاسِمُهُمَا إِنِّي لِكُمَا لَمْنَ النَّاصِحِينَ)

[Wuxu Ibliis ugu dhaartay Aadam iyo Xaawo, inaan iduin ahay labadiinna la taliye wacan]

Markaa ka digtoonaada Ibliis iyo kuwa raacay ee ay ka mid yihiin been-abuurtayaasha, waayo -

Badanaa inta aya Iblis iyo kuwa raacay leeyihiin dhaaro been ah, ballamo dhagar ah iyo hadallo loo qurxiyey luminta iyo baadiiyaynta, Ilaahey haynaga ilaaliyo annaga iyo idinkaba iyo muslimiinta kaleba sharka shayaadiinta iyo fitnadaha kuwa wax baadiyeeya iyo iilidda kuwa wax iiliya iyo dheeh-gelinta cadawga Eebbe ee xaqqa burburiya kuwaasoo raba inay ku damiyaan nuurka Eebbe afafkooda, dadkana diintooda ka dheeh geliya Eebbenaa waa kii dhammays tira nuurkiisa una gargaara diintiisa, haba neceen kuwa raacay ee ah gaalada iyo kuwa diinta leexinayey.

Hase yeeshie arinta uu sheegay been-abuurtahan ee ah inay soo baxayaan waxyaabo xun-xun waa arin jira, Quraanka kariimka ah iyo Sunnah Nebiga ﷺ ee daahirka ah way ka digeen digniin midaa ugu xeel dheer, Quraanka iyo Sunnah ayaana waxa kku sugar Hanuun iyo wax inagu filanba, Ilaahey baan ka baryaynaa inuu hagaajiyo xaaladaha Muslimiinta iyo inuu ku galladaysto dushooda xaqqa raaciddiisa iyo toosnaan ay xaqqa ku toosnaadaan iyo noqosho loo noqdo Ilaahey xaggiisa nasahnaaye, oo laga noqdo Denbi oo dhan waayo Eebbe waa Toobad aqbale naxariiste ah, ahna kii kara shay kasta. Waxase uu ka sheegay saacadda Qiyaame calaamadeheeda, waxa caddaysay Axaadiista Nebiga ﷺ wixii ahaan doona oo ka mid ah calaamadaha saacadda -

Qiyaame, Qur'aanka kariimka ahina wuu tilmaamay badh ka mid ah, hadaba qofkii doonaya inuu ogaado arinkaas wuxu ka helayaa meeshiisa o ah kutubta Sunnada iyo dadka Cilmiga iyo Iimaanka ehelka u ah waxa ay allifeen, dadkuna uma baahna been-abuurtaaan iyo kuwa la mid ka ah caddayntiisa iyo dheeh gelintiisa iyo ku dhex darkiisa uu xaqqa ku daraayo baadilka, waxaana nagu filan Ilaahey, mid la talo saartona isagaa u nicmo leh, xeelad ma jirto, xoogna ma jiro kuwa Eebaha korreeyey ee weynaa mooyee, mahad o dhan Ilaahey baa iska leh, Allihii Unka oo dhan iska lahaa, naxariista Eebbe iyo nabad gelyadiisu ha ahaato Addoonkiisa ahna Rasuulkiisa ﷺ korkiisa, ee runta badnaa, amaanada badnaa, ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo kuwii wanaag ku raacay ilaa maalinta Qiyaamaha naxariis iyo nabad gelyo dushooda Alle ha yeelo.

Waxa qoray : Madaxa Guud ee maamulka cilmi baarista iyo war-celinta iyo u yeeridda iyo Hanuuninta.

Al-Sheikh Abdil-Aziz Bin Abdalla Bin Baz

Waxa turjumay : Al-Sheikh Abdirahman Bin Mohamed Bin Qayliye Al-Qaasimi

باللغة الصومالية

كتابه حكم

على كذب الوصية المنسوبة للشيخ أحمد
خادم الحجرة النبوية



رسالة للأمة الصومالية العزيزة والقادة
للأوقاف العامة من إنجازها الباقي في عز الدين
الباقي للملكة العزيزة السعيدة

وقف لله تعالى
الطبعة الأولى
١٤٢٠ هـ ١٩٩٩ م

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

تنبيه هام على كذب الوصية المنسوبة للشيخ أحمد خادم الحرم النبوى الشريف

من عبدالعزيز بن عبدالله بن باز إلى من يطلع عليه من المسلمين حفظهم الله بالإسلام، وأعادنا وإياهم من شر مفتريات الجهلة الطغام أمين.

سلام عليكم ورحمة الله وبركاته. أما بعد:

فقد اطلعت على كلمة منسوبة إلى الشيخ أحمد خادم الحرم النبوى الشريف بعنوان: (هذه وصية من المدينة المنورة، عن الشيخ أحمد خادم الحرم النبوى الشريف).

قال فيها: (كنت ساهراً ليلة الجمعة أتلوا القرآن الكريم، وبعد تلاوة قراءة أسماء الله الحسنى،

فلما فرغت من ذلك تهيات للنوم، فرأيت صاحب
الطلعـة البـهـيـة رسول الله ﷺ الذي أتـى بـالـآـيـات
الـقـرـآنـيـة وـالـأـحـكـامـ الشـرـيفـة؛ رـحـمـةـ بـالـعـالـمـينـ
سـيـدـنـاـ مـحـمـدـ ﷺ، فـقـالـ: يـاـ شـيـخـ أـحـمـدـ، قـلـتـ:ـ
لـبـيـكـ يـاـ رـسـوـلـ اللهـ، يـاـ أـكـرـمـ خـلـقـ اللهـ، فـقـالـ لـيـ:ـ أـنـ
خـجـلـانـ مـنـ أـفـعـالـ النـاسـ الـقـبـيـحةـ، وـلـمـ أـقـدـرـ أـنـ
أـقـابـلـ رـبـيـ وـلـاـ الـمـلـائـكـةـ؛ـ لـأـنـ مـنـ الـجـمـعـةـ إـلـىـ
الـجـمـعـةـ مـاتـ مـائـةـ وـسـتـوـنـ أـلـفـأـ عـلـىـ غـيرـ دـيـنـ
الـإـسـلـامـ،ـ ثـمـ ذـكـرـ بـعـضـ مـاـ وـقـعـ فـيـ النـاسـ مـنـ
الـمـعـاصـيـ،ـ ثـمـ قـالـ:ـ فـهـذـهـ الـوـصـيـةـ رـحـمـةـ بـهـمـ مـنـ
الـعـزـيزـ الـجـبارـ،ـ ثـمـ ذـكـرـ بـعـضـ أـشـرـاطـ السـاعـةـ .ـ .ـ .ـ
إـلـىـ أـنـ قـالـ:ـ فـأـخـبـرـهـمـ يـاـ شـيـخـ أـحـمـدـ بـهـذـهـ الـوـصـيـةـ؛ـ
لـأـنـهـ مـنـقـولـةـ بـقـلـمـ الـقـدـرـ مـنـ الـلـوـحـ الـمـحـفـوظـ،ـ وـمـنـ
يـكـتبـهـاـ وـيـرـسـلـهـاـ مـنـ بـلـدـ إـلـىـ بـلـدـ،ـ وـمـنـ مـحـلـ إـلـىـ
مـحـلـ بـنـيـ لـهـ قـصـرـ فـيـ جـنـةـ،ـ وـمـنـ لـمـ يـكـتبـهـاـ

ويرسلها حرمت عليه شفاعتي يوم القيمة، ومن كتبها و كان فقيراً أغناه الله ، أو كان مديوناً قضى الله دينه ، أو عليه ذنب غفر الله له ولوالديه ببركة هذه الوصية ، ومن لم يكتبها من عباد الله اسود وجهه في الدنيا والآخرة .

وقال : والله العظيم (ثلاثاً) هذه حقيقة ، وإن كنت كاذباً أخرج من الدنيا على غير الإسلام ، ومن يصدق بها ينجو من عذاب النار ، ومن كذب بها كفر) .

هذه خلاصة ما في هذه الوصية المكذوبة على رسول الله ﷺ ، ولقد سمعنا هذه الوصية المكذوبة مرات كثيرة منذ سنوات متعددة تنشر بين الناس فيما بين وقت وآخر ، وتروج بين الكثير من العامة ، وفي ألفاظها اختلاف ، وكاذبها يقول : إنه رأى النبي ﷺ في النوم فحمله هذه الوصية ، وفي

هذه النشرة الأخيرة التي ذكرناها لك أيها القارىء،
زعم المفترى فيها أنه رأى النبي ﷺ حين تهياً للنوم
لا في النوم ، فالمعنى : أنه رآه يقظة .

زعم هذا المفترى في هذه الوصية أشياء كثيرة
هي من أوضح الكذب وأبين الباطل ، سأنبهك
عليها قريراً في هذه الكلمة إن شاء الله ، ولقد نبهت
عليها في السنوات الماضية ، وبيّنت للناس أنها
من أوضح الكذب وأبين الباطل ، فلما اطلعت
على هذه النشرة الأخيرة ترددت في الكتابة عنها؛
لظهور بطلانها وعظم جرأة مفتريها على الكذب ،
وما كنت أظن أن بطلانها يروج على من له أدنى
بصرة أو فطرة سليمة . ولكن أخبرني كثير من
الإخوان أنها قد راجت على كثير من الناس ،
وتداولوها بينهم ، وصدقها بعضهم ، فمن أجل
ذلك رأيت أنه يتبعن على أمثالى الكتابة عنها؛

لبيان بطلانها، وأنها مفترقة على رسول الله ﷺ حتى لا يغتر بها أحد، ومن تأملها من ذوي العلم والإيمان أو ذوي الفطرة السليمة والعقل الصحيح، عرف أنها كذب وافتراء من وجوه كثيرة.

ولقد سألت بعض أقارب الشيخ أحمد المنسوبة إليه هذه الفريدة عن هذه الوصية، فأجابني بأنها مكذوبة على الشيخ أحمد، وأنه لم يقلها أصلاً، والشيخ أحمد المذكور قد مات من مدة، ولو فرضنا أن الشيخ أحمد المذكور أو من هو أكبر منه زعم أنه رأى النبي ﷺ في النوم أو اليقظة، وأوصاه بهذه الوصية - لعلمنا يقيناً أنه كاذب، أو أن الذي قال له ذلك شيطان، وليس هو الرسول ﷺ، لوجوه كثيرة منها:

الوجه الأول: أن الرسول ﷺ لا يُرى في اليقظة بعد وفاته ﷺ ومن زعم من جهلة الصوفية أنه يرى

النبي ﷺ في اليقظة، أو أنه يحضر المولد، أو ما أشبه ذلك فقد غلط أقبح الغلط، ولبس عليه غاية التلبيس، ووقع في خطأ عظيم، وخالف الكتاب والسنة وإجماع أهل العلم؛ لأن الموتى إنما يخرجون من قبورهم يوم القيمة، لا في الدنيا، كما قال الله سبحانه وتعالى : ﴿ ثُمَّ إِنَّكُمْ بَعْدَ ذَلِكَ لَمْ تَشْهُدُنَّ ۝ فَرَأَيْتُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ تُبَعَثُونَ ۝ ۱۶ ۝﴾^(١).

فأخبر سبحانه أن بعث الأموات يكون يوم القيمة لا في الدنيا، ومن قال خلاف ذلك فهو كاذب كذباً بيناً، أو غالط ملبس عليه، لم يعرف الحق الذي عرفه السلف الصالح ودرج عليه أصحاب الرسول ﷺ وأتباعهم بإحسان.

الوجه الثاني : أن الرسول ﷺ لا يقول خلاف

(١) سورة المؤمنون، الآياتان ١٥، ١٦.

الحق، لا في حياته، ولا في وفاته، وهذه الوصية
تخالف شريعته مخالفة ظاهرة من وجوه كثيرة -
كما يأتي : - وهو ﷺ قد يُرى في النوم، ومن رأه
في المنام على صورته الشريفة فقدرآه؛ لأن
الشيطان لا يتمثل في صورته، كما جاء بذلك
الحديث الصحيح الشريف، ولكن الشأن كل
الشأن في إيمان الرائي وصدقه وعدالته وضبطه
وديانته وأمانته، وهل رأى النبي ﷺ في صورته أو
في غيرها؟ ، ولو جاء عن النبي ﷺ حديث قاله في
حياته من غير طريق الثقات العدول الضابطين لم
يعتمد عليه، ولم يحتج به، أو جاء من طريق
الثقات الضابطين ولكنه يخالف رواية من هو
أحفظ منهم وأوثق مخالفة لا يمكن معها الجمع
بين الروايتين لكان أحدهما منسوحاً لا يعمل به،
والثاني ناسخ يعمل به حيث أمكن ذلك بشرطه،

وإذا لم يمكن ذلك ولم يمكن الجمع، وجب أن تطرح روایة من هو أقل حفظاً وأدنى عدالة، والحكم عليها بأنها شاذة لا يعمل بها، فكيف بوصية لا يعرف صاحبها الذي نقلها عن رسول الله ﷺ، ولا تعرف عدالته وأمانته . . . فهي والحالة هذه حقيقة بأن تطرح ولا يلتفت إليها، وإن لم يكن فيها شيء يخالف الشرع، فكيف إذا كانت الوصية مشتملة على أمور كثيرة تدل على بطلانها، وأنها مكذوبة على رسول الله ﷺ، ومتضمنة لتشريع دين لم يأذن به الله ! وقد قال النبي ﷺ: «من قال علىَّ ما لم أُقل فليتبواً مقعده من النار»^(١).

(١) وله روایات أخرى، منها: «من كذب على متعمداً فليتبواً مقعده من النار» متفق عليه، ورواوه الإمام أحمد، والترمذى، والنسائى، وابن ماجه، من طرق كلها صحاح .

وقد قال مفتري هذه الوصية على رسول الله ﷺ
 ما لم يقل ، وكذب عليه كذباً صريحاً خطيراً ، فما
 أحراء بهذا الوعيد العظيم ، وما أحقه به إن لم يبادر
 بالتوبة وينشر للناس أنه قد كذب في هذه الوصية
 على رسول الله ﷺ ؛ لأن من نشر باطلًا بين الناس
 ونسبة إلى الدين لم تصح توبته منه إلا بإعلانها
 وإظهارها ، حتى يعلم الناس رجوعه عن كذبه
 وتكمليه لنفسه ؛ لقول الله عز وجل : ﴿ إِنَّ الَّذِينَ
 يَكْتُمُونَ مَا أَنْزَلَنَا مِنَ الْبَيِّنَاتِ وَالْمُهَدَّىٰ مِنْ بَعْدِ مَا بَيَّنَهُ
 لِلنَّاسِ فِي الْكِتَابِ أُولَئِكَ يَلْعَنُهُمُ اللَّهُ وَيَلْعَنُهُم
 الْكَلِّيْنُونَ ﴾ ١٥٩ ﴿ إِلَّا الَّذِينَ تَابُوا وَأَصْلَحُوا وَبَيَّنُوا فَأُولَئِكَ
 أَنُوْبُ عَلَيْهِمْ وَأَنَا التَّوَابُ الرَّحِيمُ ﴾ ١٦٠ . ﴿

فأوضح الله سبحانه وتعالى في هذه الآية

(١) سورة البقرة، الآياتان ١٥٩ ، ١٦٠ .

الكريمة أن من كتم شيئاً من الحق لم تصح توبته من ذلك إلا بعد الإصلاح والتبيين، والله سبحانه قد أكمل لعباده الدين، وأتمن عليهم النعمة ببعث رسوله محمد ﷺ وما أوحى الله إليه من الشرع الكامل، ولم يقبحه إليه إلا بعد الإكمال والتبيين، كما قال عز وجل : «**أَلَيْوَمَ أَكَمَّلْتُ لَكُمْ دِينَكُمْ وَأَتَمَّتُ عَلَيْكُمْ نِعْمَتِي**»^(١).

ومفترى هذه الوصية قد جاء في القرن الرابع عشر يريد أن يلبيس على الناس دينهم، ويشرع لهم ديناً جديداً، يتربّ عليه دخول الجنة لمن أخذ بتشريعه وحرمان الجنة ودخول النار لمن لم يأخذ بتشريعه، ويريد أن يجعل هذه الوصية التي افترىها أعظم من القرآن وأفضل، حيث افترى فيها أن من

(١) سورة المائدة، الآية ٣.

كتبها وأرسلها من بلد إلى بلد أو من محل إلى محل بُني له قصر في الجنة، ومن لم يكتبها ويرسلها حرمت عليه شفاعة النبي ﷺ يوم القيمة، وهذا من أقبح الكذب، ومن أوضح الدلائل على كذب هذه الوصية، وقلة حياء مفتريها، وعظم جرأته على الكذب؛ لأن من كتب القرآن الكريم وأرسله من بلد إلى بلد، أو من محل إلى محل لم يحصل له هذا الفضل، إذا لم ي العمل بالقرآن الكريم، فكيف يحصل لكاتب هذه الفريدة وناقلها من بلد إلى بلد، ومن لم يكتب القرآن ولم يرسله من بلد إلى بلد لم يُحرِّم شفاعة النبي ﷺ إذا كان مؤمناً به تابعاً لشريعته، وهذه الفريدة الواحدة في هذه الوصية تكفي وحدها للدلالة على بطلانها، وكذب ناشرها ووقاحتها وغباوتها وبعده عن معرفة ما جاء به الرسول ﷺ من الهدى، وفي

هذه الوصية سوى ما ذكر أمور أخرى كلها تدل على بطلانها وكذبها، ولو أقسم مفترتها ألف قسم أو أكثر على صحتها، ولو دعا على نفسه بأعظم العذاب وأشد النكال على أنه صادق لم يكن صادقاً ولم تكن صحيحة، بل هي والله ثم والله من أعظم الكذب وأقبح الباطل، ونحن نشهد الله سبحانه ومن حضرنا من الملائكة، ومن اطلع على هذه الكتابة من المسلمين شهادة نلقى بها ربنا عز وجل : أن هذه الوصية كذب وافتراء على رسول الله ﷺ أخزى الله من كذبها وعامله بما يستحق .

ويدل على كذبها وبطلانها سوى ما تقدم أمور كثيرة :

الأول منها : قوله فيها : (لأن من الجمعة إلى الجمعة مات مائة وستون ألفاً على غير دين

الإسلام؛ لأن هذا من علم الغيب، والرسول ﷺ قد انقطع عنه الوحي بعد وفاته، وهو في حياته لا يعلم الغيب فكيف بعد وفاته؟ لقول الله سبحانه: ﴿ قُلْ لَا أَقُولُ لِكُمْ عِنْدِي خَرَائِنُ اللَّهِ وَلَا أَعْلَمُ بِالْغَيْبِ ﴾^(١)، وقوله تعالى: ﴿ قُلْ لَا يَعْلَمُ مَنْ فِي السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ الْغَيْبُ إِلَّا اللَّهُ ﴾^(٢).

وفي الحديث الصحيح عن النبي ﷺ أنه قال: «يُذاد رجال عن حوضي يوم القيمة فأقول: ياربّ، أصحابي أصحابي، فيقال لي: إنك لا تدری ما أحدثوا بعدي فأقول كما قال العبد الصالح: ﴿ وَكُنْتُ عَلَيْهِمْ شَهِيدًا مَا دُمْتُ فِيهِمْ فَلَمَّا تَوَفَّيْتَنِي كُنْتَ أَنْتَ الرَّقِيبُ عَلَيْهِمْ وَأَنْتَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ

(١) سورة الأنعام، الآية ٥٠.

(٢) سورة النمل، الآية ٦٥.

الثاني من الأمور الدالة على بطلان هذه الوصية، وأنها كذب:

قوله فيها: (من كتبها وكان فقيراً أغناه الله، أو مديوناً قضى الله دينه، أو عليه ذنب غفر الله له ولوالديه ببركة هذه الوصية)... إلى آخره.

وهذا من أعظم الكذب، وأوضح الدلائل على كذب مفتريها، وقلة حيائه من الله ومن عباده؛ لأن هذه الأمور الثلاثة لا تحصل بمجرد كتب القرآن الكريم، فكيف تحصل لمن كتب هذه الوصية الباطلة! وإنما يريد هذا الخبيث التلبيس على الناس وتعليقهم بهذه الوصية حتى يكتبوها ويتعلقو بها الفضل المزعوم، ويدعوا الأسباب

(١) سورة المائدة، الآية ١١٧.

التي شرعها الله لعباده، وجعلها موصلة إلى الغنى
وقضاء الدين ومغفرة الذنوب، فنعود بالله من
أسباب الخذلان وطاعة الهوى والشيطان.

الأمر الثالث من الأمور الدالة على بطلان هذه

الوصية:

قوله فيها: (ومن لم يكتبها من عباد الله اسود وجهه في الدنيا والآخرة).

وهذا أيضاً من أقبح الكذب، ومن أبين الأدلة
على بطلان هذه الوصية، وكذب مفتريها، كيف
يجوز في عقل عاقل أن من لم يكتب هذه الوصية
التي جاء بها رجل مجهول في القرن الرابع عشر،
يفتريهَا على رسول الله ﷺ ويزعم: أن من لم
يكتبها يسود وجهه في الدنيا والآخرة، ومن كتبها
كان غنياً بعد الفقر، وسلامياً من الدين بعد تراكمه
عليه، ومغفوراً له ما جناه من الذنوب، سبحانه

قوله فيها: (ومن يصدق بها ينجو من عذاب النار، ومن كذب بها كفر).

وهذا أيضاً من أعظم الجرأة على الكذب، ومن أقبح الباطل، يدعوا هذا المفتري جميع الناس إلى أن يصدقوا بفريته، ويزعم أنهم بذلك ينجون من عذاب النار، وأن من كذب بها يكفر، لقد أعظم والله هذا الكذاب على الله الفرية وقال - والله - غير الحق، إن من صدق بها هو الذي يستحق أن يكون كافراً لا من كذب بها؛ لأنها فرية وباطل وكذب لا أساس له من الصحة، ونحن نشهد الله على أنها كذب، وأن مفترتها كذاب يريد أن يشرع للناس مالم يأذن به الله، ويدخل في دينهم ما ليس منه، والله قد أكمل الدين وأتمه لهذه الأمة من قبل هذه الفرية بأربعة عشر قرناً.

فانتبهوا أيها القراء والإخوان، وإياكم

هذا بهتان عظيم .

وإن الأدلة والواقع يشهدان بكذب هذا المفترى ، وعظم جرأته على الله وقلة حيائه من الله ومن الناس ، فهو لاء أمم كثيرة لم يكتبواها ، فلم تسود وجوههم ، وهاهنا جم غفير لا يحصيهم إلا الله قد كتبواها مرات كثيرة فلم يقض دينهم ، ولم ينزل فقرهم ، فنعود بالله من زيف القلوب ورiven الذنوب ، وهذه صفات وجزاءات لم يأت بها الشرع الشريف لمن كتب أفضل كتاب وأعظمه ، وهو : القرآن الكريم ، فكيف تحصل لمن كتب وصية مكذوبة مشتملة على أنواع من الباطل ، وجمل كثيرة من أنواع الكفر ؟ ! سبحان الله ، ما أحلمه على من اجترأ عليه بالكذب .

الأمر الرابع من الأمور الدالة على أن هذه الوصية من أبطل الباطل ، وأوضح الكذب :

والتصديق بامثال هذه المفتريات، وأن يكون لها رواج فيما بينكم، فإن الحق عليه نور، لا يلتبس على طالبه، فاطلبوا الحق بدليله، واسألو أهل العلم عمما أشكل عليكم، ولا تغتروا بحلف الكاذبين، فقد حلف إبليس اللعين لأبويكم على: أنه لهما من الناصحين، وهو أعظم الخائنين، وأكذب الكاذبين، كما حكى الله عنه ذلك في سورة الأعراف، حيث قال سبحانه ﴿ وَقَاتَمُهُمَا إِنِّي لِكُلِّ مَلِئِنَ النَّصِيحِينَ ﴾^(١).

فاحذروه واحذروا أتباعه من المفترين، فكم له ولهم من الأيمان الكاذبة والعهود الغادرة والأقوال المزخرفة للإغواء والتضليل.

عصمني الله وإياكم وسائر المسلمين من شر

(١) سورة الأعراف، الآية ٢١.

الشياطين ، وفتن المضللين ، وزيف الزائغين ،
وتلبيس أعداء الله المبطلين ، الذين يريدون أن
يطفئوا نور الله بأفواهم ، ويُلْبِسُوا على الناس
دينهم ، والله متم نوره ، وناصر دينه ، ولو كره
أعداء الله من الشياطين ، وأتباعهم من الكفار
والملحدين .

وأما ما ذكره هذا المفترى من ظهور
المنكرات ، فهو أمر واقع ، والقرآن الكريم والسنة
المطهرة قد حذرا منها غاية التحذير ، وفيهما
الهداية والكفاية .

ونسأل الله أن يصلاح أحوال المسلمين ، وأن
يمنّ عليهم باتباع الحق والاستقامة عليه ، والتوبة
إلى الله سبحانه من سائر الذنوب ، فإنه التواب
الرحيم ، وال قادر على كل شيء .
واما ما ذكر عن أشراط الساعة ، فقد أوضحت

الأحاديث النبوية ما يكون من أشراط الساعة،
وأشار القرآن الكريم إلى بعض ذلك، فمن أراد أن
يعلم ذلك وجده في محله من كتب السنة،
ومؤلفات أهل العلم والإيمان، وليس بالناس
حاجة إلى بيان مثل هذا المفتري وتلبيسه، ومزجه
الحق بالباطل، وحسبنا الله ونعم الوكيل، ولا
حول ولا قوة إلا بالله العلي العظيم.

والحمد لله رب العالمين، وصلى الله وسلم
على عبده ورسوله الصادق الأمين، وعلى آله
وأصحابه وأتباعه بإحسان إلى يوم الدين.

ح) رئاسة إدارة البحوث العلمية والإفتاء ، ١٤١٩ هـ

فهرسة مكتبة الملك فهد الوطنية أثناء النشر

ابن باز ، عبدالعزيز بن عبدالله

تبنيه هام على كذب الوصية للشيخ أحمد خادم الحجرة النبوية / ترجمة عبدالرحمن محمد
قيلي .- الرياض.

٤٤ ص : ١٧×١٢ سم

ردمك: ٩٩٦٠-١١-١٠١-٦

(النص باللغة الصومالية)

١- الإسلام - دفع مطاعن

٢- الحديث - دفع مطاعن

١- قيلي ، عبدالرحمن محمد (مترجم) بـ العنوان

١٩/٤٦١٨ . ديوبي ٢١٦

رقم الإيداع : ١٩/٤٦١٨

ردمك : ٩٩٦٠-١١-١٠١-٦



مطابع الحميدصي

تلفون: ٤٥٨١٠٠٠ - فاكس: ٤٥٩٢٢١٧

**تنبيه هام على كذب الوصية
المنسوبة للشيخ أحمد خادم الحجرة النبوية الشريفة**

لسماحة الشيخ
عبد العزيز بن عبد الله بن باز
باللغة الصومالية

ترجمة
فضيلة الشيخ
عبد الرحمن بن محمد قيلي
طبع على نفقة بعض المحسنين
تحت إشراف
رئاسة إدارة البحوث العلمية والإفتاء
الإدارة العامة لمراجعة المطبوعات الدينية

وقف لله تعالى

الطبعة الأولى
١٤١٩ - ١٩٩٩ م